# DAAWEYNTA JAALIYADEED EE KORMEERSAN EE LOOGU TALAGALAY BUKAANLAYDA QAYBTA 3

(Qaybta 17A ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1983)

| | |
|---|---|
| 1. Magaca bukaanka | |
| 2. Magaca qofta mas'uul ka ah xannaanadaada ("takhtarka mas'uul kaa ah") | |
| 3. Taariikhda la bilaabi doono daaweyntaada jaaliyadeed ee kormeersan | |

## Waa maxay sababta aan ku jiro daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan?

Waxaad ku jirta daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan sida u qabo qaybta 17A ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1983 sababtoo ah qofka mas'uul ka ah caafimaadkaaga (takhtarka mas'uul kaa ah) ayaa u maleeyaa inaad awoodi kartid inaad isbitaalka ka baxdo laakin u ka wel-welsan yahay inaadan sii wadi doonin daaweyntaada, ama inaad u baahan doonto in waqti ogeysiis gaaban lagugu jiifiyo isbitaalka mar labaad sidii daaweyn dheeraad ah laguu siiyo.

Daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan waxaa loola jeedaa in kooxdaada xannaanada samayn doono waxa ugu fiican sidii ay kugu caawiyaan inaad fiicnaato ka dib markii isbitaalka lagaa sii daayo, laakin haddii takhtarka mas'uul kaa ah u maleeyo inaad mar labaad u baahan tahay in isbitaalka lagu jiifiyo, lagaa codsan karo inaad ku soo noqoto isbitaalka sidii aad u hesho daaweynta aad u baahan tahay.

Takhtarka mas'uul kaa ah ayaa kuu sheegi doono qaban-qaabooyinka daaweynta iyo xannaanada aad u baahan tahay markii isbitaalka lagaa soo daayo.

## Waa maxay amarka daaweynta jaaliyadeed?

Amarka daaweynta jaaliyadeed waa foom loo baahan yahay inay buuxiyaan takhtarka mas'uul kaa ah iyo xirfadlaha caafimaadka maskaxda ee la aqoonsan yahay ayagoo halkaaso ku sheegaayo in daaweyn jaaliyadeed kormeersan lagugu bilaabo.

Xirfadlaha caafimaadka maskaxda ee la aqoonsan yahay waa qof si gaar ah loogu tababarey inuu ku caawiyo go'aan ku gaaridda haddii u qof u baahan yahay in isbitaalka lagu haayo sida u qabo Xeerka Caafimaadka Maskaxda.

## Maxaa dhacaayo markii aan isbitaalka ka tago?

Takhtarka mas'uul kaa ah ayaa kula hadli doono kuuna sheegi dono wixii laga qabto daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan.

Waxaa suurtogal ah in lagaa codsado inaad raacdo daaweynta laguu qaban-qaabiyey, iyo sidoo kale qaban-qaabooyin kale oo kugu caawinaayo inaad si nabad leh ugu dhax noolaato jaaliyadda iyo si caafimaad-qab leh ku jogto. Kuwaani waxaa lagu magacaaba “shuruudo”, waxaana loo ogol yahay sida u qabo qaybta 17B ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda.

Takhtarka mas'uul kaa ah iyo xirfadlaha caafimaadka maskaxda oo la aqoonsan yahay waa inay aqbalaan in shuruudahaan ay habboon yihiin, iyo waxay ku qaban-qaabin doonaan caawinaad walba ee aad u baahan tahay sida aad u raacdid. Waa inaad la hadashaa takhtarka mas'uul kaa ah haddii sabab walba ha ahaadee ka wel-welsan tahay wixii lagaa codsado inaad sameyso, ama aadan sameynin, markii aad ku jirto daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan.

## Maxa dhacaayo haddii aanan raacin shuruudaha?

Haddii aadan raacin shuruudaha kooxdaada xannaanada ayaa ka fikiri doono haddii aad u baahan tahay inaad u  soo laabato isbitaalka sidii laguu daaweeyo.

Waxaa lagaa codsan karaa inaad ku soo laabato isbitaalka haddii takhtarka mas'uul kaa ah u maleeyo inuu kani yahay sida kaliya ee aad ku heli karto daaweyta aad u baahan tahay. Mar-mar waxaa xittaa kani loo baahan karaa haddii aad raacdey dhammaan shuruudaha. Kani waxaa lagu magacaaba “dib u soo celin” isbitaal.

Haddii takhtarka mas'uul kaa ah u maleeyo in loo baahan yahay in dib lagugu soo celiyo isbitaalka, takhtarka mas'uul kaa ah ayaa si qoraal ah kugu sheegi doono in loo baahan yahay inaad isbitaalka ku soo laabato isla markiiba ama waqti gooni ah. Haddii aad imaan wayso isbitaalka markii laguu sheego, waxaa isbitaalka lagugu soo celin karaa xoog.

Haddii dib laguu soo celiyo isbitaalka, waxaa halkaas lagugu hayn karaa ilaa 72 saacadood. Haddii takhtarka mas'uul kaa ah u maleeyo inaad u baahan tahay inaad isbitaalka joogto waqti ka dheer, xirfadlaha caafimaadka maskaxda ee la aqoonsan yahay ayaa laga codsan doonaa inuu kula hadlo. Waxaa waxyaabahaan laguu macnayn doonaa markii waqtigaas la gaaro.

## Waa maxay daaweynta layga rabo inaan sameeyo intii aan ku jiro daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan?

Takhtarka mas'uul kaa ah ayaa baahida daaweyntaada kaala hadli doono iyo go'aamin doono goorta iyo habka lagugu daaweyn doono jaaliyadda.

## Miyaan diidi karaa in la ii daweeyo?

Waxaad xaq u leedahay inaad diido daaweyn haddii aadan rabin, laakin kani waxaa loola jeeda in takhtarka mas'uul kaa ah u baahan doono inuu isbitaalka kugu soo celiyo.

Haddii aadan rabin daaweynta lagugula taliyey, waa inaad la hadasha takhtarka mas'uul kaa ah sida ugu dhaqsi badan.

## Maxaa dhacaayo haddii aan si xun u jirranahay iyo go'aan ka gaari karin haddii aan oggolahay daaweyntayda?

Haddii dadka ku daaweynaayo u maleyaan inaadan leheen awood aad ku go'aamiso haddii aad daaweynta qaadato iyo in kale, waxay ku siin karaan daaweynta ay u maleyaan inaad u baahan tahay.

Laakin ma kugu qasbi karaan inaad ogolaato daaweyn haddii  aadan rabin, aysan ahayn markii  ay jiraan xaalado deg deg ah.

"Aadan leheen awood" waxaa loola jeedaa, in jirradaada maskaxeed awgeed, aadan sameyn karin hal ama ka badan afartaan waxyaabood:

- Garan karin macluumaadka ku saabsan daaweyntaada
- Xasuusato macluumaadkaas waqti kugu filan sidii aad go'aan u gaarto
- Qiimeyso macluumaadka lagu siiyo sidii aad go'aan u gaarto
- aan ku sheegi karin go'aankaaga hab walba, sida hadal, isticmaalida luqadda dhegoolka, ama dhaq-dhaqaaq fudud sida il-jabinta ama guujinta gacanta.

Sidoo kale aysan ka ahayn markii u jiro xaalada deg-deg ah, laguma siin karo daaweyn haddii aad horey u sameysay go'aan si sharci ah u dabakhmaayo ee aad ku diiday daaweynta  sida u qabo Xeerka  Awoodda Maskaxda  ee 2005,  ama qof kale ee loo ogol yahay inuu Xeerka go'aan kaaga gaaro sheegay in daaweynta lagu siinin. Kani wuxuu ahaan karaa qof aad siiday awood sharciyeed ee joogto ah, qof Maxkamadda Badbaadada kugu magaacbdey inuu wakiil kaa noqdo,ama Maxkamadda Badbaadada laftigeeda. Shaqaalaha isbitaalka ayaa ku siin karo macluumaad ka badan ee ku saabsan Xeerka Awoodda Maskaxda  2005.

## Shuruudo gaar ah ee ku saabsan ku daaweynta daawada

Markii hal bil ka badan aad sameyso daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan, waxaa dabakhmaayo shuruudo gaar ah ee ku saabsan daawada iyo daaweynta.

Haddii lagu siinaayo daawo ama daaweynta jirradaada maskaxeed, iyo la soo dhaafey in ka  badan seddax bilood markii laguu bilaabey in lagu siyo daaweyntaan intii aad isbitaalka ama daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan ku jirtay, waxaa lagaa codsan doonaa inaad takhtar madax-banaan  (oo ka socon isbitaalka ku daaweeyo) siido awood uu kuu baaro.

Takhtarkaan madaxbanaanan waxaa lagu magacaaba SOAD (Takhtarka ku Magacaaban inuu Bixiyo Rayi'ga Labaad) waxaana jagada ku magacaabo Guddi madaxbanaan ee kormeero sida loo isticmaalo Xeerka Caafimaadka Maskaxda.

Takhtarkaan wuxuu fiirin doonaa haddii daaweynta kugu habboon yahay, wuuna kula hadli doonaa ka hor intii u go'aan ka gaarin daaweynta aad u baahan tahay inaad sii waddo.

Waxaa lagu siin karaa oo kaliya daawo ama daaweyn ee takhtarkaan madaxbanaanan sheegay inuu kugu habboon yahay, aysan ahayn haddii u jiro xaalad deg-deg ah.

Waa laguu sheegi doonaa goorta iyo meesha takhtarka madaxbanaanan kugu baari doono. U tagidda takhtarka madaxbanaanan waa hal ka mid ah shuruudaha ee daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan. Haddii aadan u tegin takhtarka madaxbanaanan waqtiga iyo meesha ballan lagaaga sameeyey, takhtarka mas'uul kaa ah wuxu kugu celin karaa isbitaalka sidii aad u aragto takhtarka mdaxbanaanan.

Waxaa jiro shuruudo ka duwan  markii la sameynaayo daaweyn gaar ah, sida ku daaweynta korontada maskaxda la marsiiyo (electro-convulsive therapy (ECT)). Haddii dadka ku daaweynaayo u maleeyaan inaad u baahan tahay mid ka mid ah daweyntaan gaarka ah, shuruudaha ayaa laguu macnayn doonaa.

## Ilaa goormee ayaan ku jiri doonaa daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan?

Amarkaaga daaweynta  jaaliyadeed ee kormeersan wuxuu marka horey socon doonaa ilaa lix bilood, aysan ahayn haddii takhtarka mas'uul kaa ha go'aansado in loo baahnayn.

Waxaa lagaa codsan doonaa inaad u fasaxdo takhtarka mas'uul kaa ah inuu ku baaro lixda bilood ka dib, sidi loo fiirsho haddii aad ku jiri doontid daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan. Waxaa laguu sheegi doonaa goorta iyo meesha u takhtarka mas'uul kaa ah doonaayo inuu kugu baaro.

U tagidda takhtarka mas'uul kaa ah sidii uu baaritaankaan kugu sameeyo waa hal ka mid ah shuruudaha daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan. Haddii aadan u tagin takhtarka mas'uul kaa ah  waqtiga iyo meesha ballanka lagugu sameeyey, takhtarka mas'uul kaa ah ayaa kugu celin karo isbitaalka sidii uu kuu baaro.

Haddii takhtarka mas'uul kaa ah u maleeyo inaad u baahan tahay inaad ku jirto waqti ka dheer daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan, waxay dheerayn karaan ilaa lix bilood oo kale kadibna ilaa sanad waqtigiiba. Takhtarka mas'uul kaa ah ayaa kani kaagala hadli doono markii la gaaro gaba-gabada waqti walba.

## Miyaan rafcaan soo codsan karaa?

Haa. Waxaad codsan kartaa Maareeyayaasha Isbitaalka  adiga mas'uul kaa ah  inay joojiyaan daaweyntaada jaaliyadeed ee kormeersan. Waxaan kani codsan kartaa waqti walba. Maareeyayaasha Isbitaalka waa guddii gaar ah  ee ka shaqeeyo isbitaalka sidii ay go'aan uga gaaraan haddii  dadku weli u baahan yihiin in lagu haayo daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan.

Isbitaalka mas'uul kaa ah caadi ahaan waa isbitaalka aad ku jirtay ka hor intii aadan bilaabin daaweynta jaaliyadeed eee kormeersan. Haddii isbitaalka mas'uul kaa ah la beddelo waa laguu sheegi doonaa.

Haddii aad rabtid in Maareeyayaasha Isbitaalka joojiyaan daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan, warqad ayaad ugu qori kartaa cinwaanka hoos ku xusan:

Maareeyayaasha Isbitaalka ayaa rabi karo inay kula hadlaan ka hor intii aysan go'aansanin inay joojiyaan daaweyntaada jaaliyadeed ee kormeersan.

Qoyskaaga soke wuxuu xittaa Maareeyayaasha Isbitaalka  u sheegi karaa inay doonayaan in daaweyntaada jaaliyadeed ee Kormeersan la joojiyo. Buug-yarahaan wuxuu hoos ku macnaynayaa qofka lagu magacaabey inuu ahaado qoyskaaga soke.

Haddii qoyskaaga soke sidaani sameeyo, daaweyntaada jaaliyadeed ee kormeersan wuxuu dhammaan doonaa 72 saacadood ka dib,  aysan ka ahayn markii takhtarka mas'uul kaa ah soo sheego inaad halis u noqon kartid laftigaaga ama dadka kale haddii aad joojiso daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan. Haddii uu sidaan dhaco, waa in qoyskaaga soke sugaa ilaa lixda bilood ee xiga ka hor intii uu mar labaad ka soo codsado Maareeyayaasha Isbitaalka in lagaa joojiyo daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan.

Waxaad xittaa ka codsan kartaa Maxkamad inay sheegaan in daaweyntaada jaaliyadeed ee kormeersan la joojiyo.

## Waa maxay Maxkamadda iyo maxaa dhici doono?

Maxkamadda waa guddi madaxbanaansan oo go'aamin karo in lagaa sii daayo isbitaalka. Wuxuu kullan la sameyn doonaa adiga iyo shaqaalaha ku yaqaano. Kullanka waxaa lagu magacaabaa "dhegaysi". Waxaad qof kale  ka codsan kartaa inay dhegaysiga kuu soo raacaan sidii ay kuu caawiyaan, haddii aad doonayso. Dhegaysiga ka hor, xubinada Maxkamadda ayaa akhrin doono warbixinta isbitaalka adiga iyo daaweyntaada jaaliyadeed e kormeersan laga qorey. Hal ka mid ah xubinada Maxkamadda ayaa xittaa imaan doono sidii uu kuula hadlo.

## Gormee ayaan maxkamadda codsi ka samaysan karaa?

Waxaad codsi ka samaysan kartaa Maxkamadda hal mar lixda bilood ee ugu horreeya ee daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan. Waxaad markaa ka dib codsi labaad sameysan kartaa lixda bilood ee xiga, markaas kadibna hal mar sanad walba ee aad daaweyn jaaliyadeed kormeersan lagugu haayo.

Haddii qoyskaaga soke uu Maareeyayaasha Isbitaalka u sheegay inuu rabo in daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan lagaa joojiyo, laakin takhtarka mas'uul kaa ah ay sheegaan in lag joojinin, qoyskaaga soke ayaa Maxkamadda codsi ka sameysan karo. Qoyskaaga soke waa inuu sidaan sameeyaa 28 maalmood gudeheeda laga bilaabo taariikhda loo sheegay in takhtarka mas'uul kaa ah uu ka soo horjeedo in lagaa joojiyo daaweyntaada jaaliyadeed ee kormeersan.

Haddii aad rabtid inaad codsi ka sameyso Maxkamadda waxaad u soo qori kartaa:

The Tribunals Service
PO BOX 8793
5th Floor
Leicester
LE1 8BN Tel. 0300 123 2201

Waxaad qareen ka codsan kartaa inuu Maxkamadda uu warqad wakiil ahaan adiga kuu soo diro iyo inuu kugu caawiyo dhegaysiga. Isbitaalka mas'uul kaa ah iyo Ururka Sharciga waxay qabaan liis ku qoran qareenada kani ku takhasuusan. Looma baahno inaad qareenka lacagtiisa bixiso. Waa bilaash markii la raaco nidaamka ku Caawinta Sharciga.

## Ogeysiinta qooyskaaga soke

Nuqulka buug-yarahaan waxaa la siin doonaa qofka uu Xeerka Caafimaadka Maskaxda u ku aqoonsado inuu yahay qooyskaaga soke.

Waxaa jiro liis ku qoran dad ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda ula dhaqmo inay yihiin qoyskaaga. Caadi ahaan, qofka ugu sareeya liiskaas ayaa lagu magacaabi doonaa inuu noqdo qoyskaaga soke. Shaqaalaha isbitaalka wuxuu ku siin karaa buug-yare si fiican kani kuu sharraxaayo iyo ku qoran xuquuqyada uu qoyskaaga soke ku leeyahay daaweyntaada iyo xannaanadaada.

Xaaladdaada markii la fiiriyo, waxaa noola sheegay in qoyskaaga soke uu yahay:

| |
|---|
| |

Haddii aadan rabin inuu qofkaan helo nuqulka buug-yarahaan, fadlan u sheeg takhtarka mas'uul kaa ah,  xubin kale ee ka mid ah shaqaalaha ama qofka ku siiyey buug-yarahaan.

## Beddelida magaca qoyska soke

Haddii aadan u malayn in qofkaan u ku habboon yahay inuu ahaado qoyskaaga soke, waxaad codsi ka samayn kartaa Maxkamadda Degmada in qof kale lagu magaacabo qoyskaaga soke. Shaqaalaha isbitaalka waxay ku siin karaan buug-yare kani kuu sharraxaayo.

## Shuruud Dabakhaad

Waxaa jiro Shuruud Dabakhaad oo shaqaalaha isbitaalka ku talinaayo Xeerka Caafimaadka Maskaxda iyo sida loola dhaqmo dadka qabo dhiibato maskaxeed. Waa in shaqaalaha tixgeliyaan waxa ay Shuruudda sheegaayso markii ay go'aan ka gaarayaan xannaanadaada. Waxaad weydiin kartaa inaad aragto nuqulka Shuruudda, haddii aad doonayso.

## Sida cabasho loo sameeyo?

Haddii aad rabto inaad ka cabato wax walba ee xiriir la leh xannaanadaada iyo daaweyntaada isbitaalka, fadlan la hadal xubin ka mid ah shaqaalaha. Waxay awoodi karaan inay xaaladda xalliyaan. Waxay xittaa ku siin karaan macluumaadka hab-socodka cabashada ee isbitaalka, oo aad isticmaali karto sidii aad u xalliso cabashadaada adigoo u maraayo  wax lagu magacaabo xal-helidda deegaanka.  Waxay xittaa kuu sheegi karaan qof walba ee kale ee kugu caawin karo samaynta cabashada.

Waxaad xittaa ka caban kartaa Guddii madaxbanaanan. Guddiga wuxuu kormeera sida loo isticmaalo Xeerka Caafimaadka Maskaxda, sidii uu u hubiyo in si sax ah loo isticmaalo, iyo in bukaanlayda loo xannaaneeyo sii fiican intii ay isbitaalka joogaan ama ku jiran daaweynta jaaliyadeed ee kormeersan.  Shaqaalaha isbitaalka waxay ku siin karaan buug-yare kuu macneynaayo sidii loola xiriiro Guddiga.

## Sidii aad u hesho caawinaad iyo macluumaad dheeraad ah

Haddii uu jiro wax aadan ka garan xannaanadaada iyo daaweyntaada, takhtarka mas'uul kaa ah ama xubin ka mid ah shaqaalaha ayaa isku dayi doono inay ku caawiyaan. Fadlan ka codso xubin ka mid ah shaqaalaha inuu kuu sharraxo haddii uu jiro wax aadan ka garanin buug-yarahaan ama haddii aad qabtid su'aalo oo buug-yarahaan ka jawaabin.

Fadlan weydii haddii aad qof kale u rabto  nuqul kale ee buugyarahaan.